SOMALI FOOTBALL FEDERATION

**GUDDIGA AADAABTA IYO ANSHAXA**

**Summad: G.A.A/14/2025** **Taariikh: 28/10/2025**

**UJEEDO: GO'AAN ANSHAX MARIN, SI WAAFAQSAN QOD. 97 XA&A EE XKCS GUDIGA ANSHAXA IYO AADAABTA OO KA KOOBAN**

| | | |
|---|---|---|
| 1 | **Ahmed Abdikadir Mohamed** | **GUDDOMIYE** |
| 2 | **Khadar Maxamed Cali** | **XUBIN** |
| 3 | **Mohamed Hassan Hussein** | **XUBIN** |

**DACWAD ANSHAX MARIN AH OO LOO HAYSTO EEDAYSANE**

| | | |
|---|---|---|
| **1** | **C/QANI SACIID CARAB** | **EEDEYSANE** |

## HORDHACA

Waxaa Gudgiga Aadaabta iyo Anshaxa soo gaaray warqad arji ah oo ku taariiqaysan 04/08/2025, tixraceedu yahay SFF/LO/015/2025, ujeedkeeduna yahay eedeyn sharciyeed oo ka dhan ah gudoomiyihii hore ee XKCS, Mudane Cabdiqani Saciid Carab, waxay kasoo baxday waaxda sharciyada ee XKCS, waxaana ku saxiixan Garyaqaan Axmed Cabdiraxmaan Cali.

Duluucda eedda ama warbixinta danbi ee lasoo gudbiyay waxa ay ku saabsaneyd:

1. Jabinta Dastuurka SFF ee dhaqan galay 2022 iyo ku Takrifal awoodeed, waxuu si aan sharci ahayn u adeegsaday awood uu lahaa maamul ahaan Xoghayah si uu ugaaro go'aano aan lagu wargelin Xoghaayaha, sidoo kale waxuu isticmaalay Emailka rasmiga ah ee Xooghaayaha Guud isaga oo iska dhigaya Xoghayaha, waxa uuna email rasmi ah u diray hay'adda FIFA iyo CAF, qodobada uu ku xadgudbay waxay kala yahiin 41,43,44,45,46 iyo qodobka 59 Xeerka anshaxa iyo aadaabta XKCS.
2. Musuq maasuq si waafaqsan qod: 56 ee xeerka Anshaxa iyo aadaabta XKCS.
3. Isticmaal qaldan oo hanti iyo masuuliyad ah
4. Iska horkeenida kooxaha iyo xariirka kubadda cagta.

## BAARISTA GUDDIGA

Guddiggu asiga oo guddanaya waajibaadkiisa ku xusan **Qod. 65, 88 XA&A ee XKCS,** waxa uu gudda galay baaristiisa la xariirta warka danbi ee soo gaaray, waxa uuna raadiyay caddeymaha loo haayo jabinta la sheegay in ay dhacday, waxa uu wareysi la yeeshay soo gudbiyaha warbixinta danbiga, sida uu qabo **Qod. 82**, **89** Xeerka Adaabta iyo Anshaxa XKCS, baarista guddiga waxyaabaha uu ku ogaaday waxaa kamid ah:-

1. In uu dhacay fal danbiyeed ah ku tagrifal awoodeed oo uu ku kacay Guddoomiyihii hore ee Xiriirka Kubadda Cagta Soomaaliyeed Cabdiqani Saciid Carab, xadgudubka la xariira ku tagrifalka awoodeed ah oo so tixnaa laga soo bilaabo 2019 ilaa 2022.
2. Intaas kadib guddigu waxa uu wareysiyo kala duwan la yeeshay dadkii uu arkay in ay wax ka ogyihiin xadgudubyada lasoo gaarsiiyay Guddigga ee uu ku kacay Eeddeysane Cabdiqani, sidoo kale waxa guddigga uu helay caddeymo isugu jiro email iyo warqadda uu qoray Cabdiqani Saciid Carab kuwaas oo muujinaya in uu jiro fal ku xadgudub awooddii uu lahaa Xoghayaha ee XKCS, ee ku xusan Qod. 59, 60 ee DXKCS ee 2019 - 2022 dhaqangalka ahaa.
3. Xadgudubka dhacay waxaa kamid ah in uu Cabdiqani Sifo sharci darro ah u maamulaayay Emailka Rasmiga ah ee XKCS, asiga oo Emailada tooska ugu socda Xoghayaha uu awood u laha asiga oo kaliya, kuwa qaarna u gudbin jiray kuwii uu doonana ka heysan jiray, shaqadaas oo ah shaqada maamulka ee uu leeyahay Xoghayaha Guud, sida ku cad Qod. 60 farqaddiisa 3aad xarafkiisa (F) ee 2019 - 2022 dhaqangalka ahaa.
4. Sidoo kale guddiggu waxa uu caddaatay in Cabdiqani Saciid Carab uusan sameyn wax xil wareejin mana wareejin hantidii uu lahaa XKCS oo ay ugu horreeyaan Domine iyo Emailka Rasmiga oo weli gacantiisa ku jira, taas oo ah arin kale oo si cad u muujineysa niyad xumada eeddeysanaha oo ah Guddoomiyihii hore ee XKCS.
5. Waxaa kale oo uu guddigu usoo baxday in aanu dhaqangal aheyn Xeerka Anshaxa iyo Aadaabta ee XKCS, kaas oo dhaqangal noqday 04/07/2024. Waxaa kale oo guddiga u caddaatay in uusan asna dhaqangal aheyn Dastuurka XKCS oo asna dhaqan gal noqday 20/10/2022 oo ah markii uu xilka ka tagay Eedeysane Cabdiqani Saciid Carab.
6. Maadaama caddeymo ku filan oo go'aan lagu gaari karo uu guddigu helay in eedeysanahu uu ku kacay falal lagu soo eeddeeyay guddiggu waxa uu uu tixgaliyay Mabda' Caalamiga ah ee dhahaaya Qaanuunku dib uma laabto **"Non retroactive principle".**
7. Guddigga waxa uu go'aamiyay in eedeysanaha lagu eedeeyo in uu ku xadgudbay **Qod. 7, 59,60** ee Dastuurkii XKCS dhaqangalkana ahaa 2019–2022 iyo Qod. 25 ee Xeerka anshaxa FIFA " FIFA code of Ethics" 2019 maadaama uusan xiligaas jirin xeer anshax oo dhaqangal ka ahaa Soomaaliya.
8. In aan ku eeddeyn karno eedeysanaha Xeerka anshaxa FIFA waxa noo ogolaanaya **Qod. 7** ee dastuurka 2019.

**Eedda Guddigga uu u jeediyay eedeysane Cabdiqani Saciid Carab**

Guddigga asiga oo cuskanaya caddeymaha uu helay iyo wareysiyada uu la yeeshay dadka xog ogaalka ah waxa uu go'aansaday in uu Cabdiqani Saciid Carab ku eedeeyo **Qod. 25 ee Xeerka Anshaxa ee FIFA**, sababtoo ah waxa uu eedeysanaha sameeyay ku xadgudub awoodihii uu laha xoghayaha asiga oo ujeeddadiisu tahay in uu gaaro dano gaar ah sida laga fahmi karo caddeymaha uu guddigu helay, sido kale mana jirin xilwareejiyay maamulka ka danbeeyay.

**OGEYSIINTA EEDDEYSANAHA DACWADDA**

1. Guddigga ayaa dhinaca la eedeyay u gudbiyay eedda loo heysto, waxuuna u sheegay in uu xaq u leeyahay in uu naf ahaantiisa iska difaaca eedda loo heysto ama uu soo wakiisho qareen ama qof asiga matala si waafaqsan **Qod. 77** Xeerka Anshaxa, ogeysiintaas oo waafaqsan **Qod. 75** ee Xeerka Anshaxa, waxaana loo diray ogeysiimaha ku kala taariikheysan:-
   I. Warqadda ujeedadeedu tahay ogeysiin dacwo ee summaddeedu tahay Summ: G.A.A/003/2025 ku taariikheysan 07/08/2025.
   II. Warqadda ujeedadeedu tahay ogeysiin dacwo ee sumaddeedu tahay Summ: G.A.A/004/2025 ku taariikheysan 14/08/2025
   III. Warqad ujeedadeedu tahay ogaysiin dacwo, sumadeeduna tahay G.A.A/007/2025, Kuna taariiqaysan 23/08/2025.
   IV. Warqad ujeedadeedu tahay ogaysiin dacwo, sumadeedu tahay G.A.A/011/2025, Kuna taariiqaysan 08/09/2025.

   Gudiga aadaabta iyo anshax waxuu u fadhiistay dhagsyiga dacwada loo haystay eedeysane cabdiqani saciid carab tariiqdu markay aheed 11/09/2025, eedeysanaha waxuu soo wakiishay qareenada kala ah:

   Garyaqaan Axmed Cabdiraxmaan Diiriye iyo garyaqaan Maxamed Wali Ciise Axmed sida ku cad wakaaladda tixraceedu yahay:001868/WNP/WR/25, Kuna tariiqaysan 31/08/2025, kana soo baxday xafiiska Wehliye Notary public, waxaana ku saxiixan DR Axmed A Wehliye,

   Qareenada waxay soo gudbiyeen warqad Arji ah, ujeedkeeduna yahay jawaab celin iyo Difaacid mudane cabdiqani saciid carab, sumadeedu tahay GLF/079/2025, kuna taariiqaysan 10/09/2025, Kana Soo Baxday xafiiska qareenada Garmaal, waxaana ku saxiixan qareenada sare ku xusan.

   Qareenada arjiga ay usoo gudbiyeen gudiga anshaxa iyo aadaabta nuxurkiisu waxuu ahaa is-hortaag, waxa uuna ka koobnaa sadax ishortaag oo kala ah:-

   **A. is-hortaaga kowaad:** Xeerka anshaxa iyo aadaabta ma ahan mid dhaqangal ku ah muwakilkeena madaama xeerka anshaxa iyo aadaabta uu dhaqangalay 4tii Juun 2024, muwalkeena waxaana lagu soo eedeeyay inuu ku xadgudbay qod 56aad Xeerka anshaxa iyo aadaabta, 2024 muwakilkeena wax xil ah kama haayin XKCS, sidaas darteed muwakilkeena inuu dhaqan gal ku aheen xeerka anshaxa iyo aadaabta xariirka kubada cagta waxaa cadeenaayo qod 4aad Ee xeerka anshaxa iyo aadaabta.

B. **is-hortaaga labaad**: qareenada waxay gudiga anshaxa iyo aadaabta ka codsadeen in la siiyo habraaca loo maray dhisida gudiga anshaxa iyo aadaabta.

C. **is-hortaaga sadaxaad**: Hanaanka oogista eedaha lidka ku ah muwakilkeena iyo qoraalka eedda qudhiisa oo aan waafaqsanayn xeerka anshaxa iyo aadaabta ee XKCS. Is-hortaaga sadaxaad waxuu lid ku yahay cidda iska leh awoodda baarista iyo soo oogidda dacwadaha anshax marinta sida ku cad qod 88 iyo 89 ee xeerka anshaxa iyo aadaabta XKCS.

## JAWAABTII GUDDIGGA EE ISHORTAAGGA SARE

Guddiggu asiga oo tixgalinaya codsiga dhinaca la eeddeyay iyo xaqa ay u leeyihiin in looga jawaabo dalabaadkooda, waxa uu go'aansaday in uusan isla fadhigaas uga jawaabin balse uu waqti qaato si uu u sameeyo baaris dhammeystiran oo la xariirta sharciyadda ishortaagga dhinaca la eeddeeyay.

## TALAABOOYIN UU GUDDIGU QAADAY

1. Guddigu asiga oo guddanaya waajibaadkiisa waxa uu dhinaca la eeddeeyay ku wargaliyay in uu jiro fadhi lagula wadaaggi doono caddeymaha la doonayo in ay iska difaacaan sidoo kalane looga jawaabo ishortaagyadoodii ay hore usoo qaddimeen, ogeysiiskaas oo ku taariikheysan 23/10/2025, looguna diray Emailka rasmigga ee qareenada Eeddeysanah.
2. Dhinaca la eeddeeyay halkii laga suggaayay in ay soo ajiibaan fadhigga lagula wadaagaayo caddeymaha ayaga ka dhanka ah si ay isaga difaacaan waxa ay guddigga usoo direen Email ay ku dalbanayaan sharciyadda guddigga lagu dhisay. Emailkaas oo ay qareenadu ku isticmaaleen jumlo dhaheysa "***Xubnaha Sheeganaya Guddigga Anshaxa iyo Aadaabta***" taas oo si cod u muujineysa in aysan dhinaca la eeddeeyay aysan aqoonsaneyn sharciyadda guddigga.
3. arintaas sare ku xusan waxa uu guddiggu u tixgaliyay una aqoonsaday in aysan dhinaca la eeddeyay aysan diyaar u aheyn in ay garbaxaan, iskana difaacaan eedda anshaxeed ee loo heysto.
4. Guddigu waxa uu dhinaca eeddeysanaha iyo qareenadiisa u tixgaliyay in uu ka dhacay xaqii isdifaaca waxa uuna sii dhaqaajiyay dacwaddii ayaga ka dhanka aheyd.

## ASBAABTA GO'AANKA

Guddigga Anshaxa iyo Aadaabta XKCS:-

1. **Markuu arkay** warqada kasoo baxday xafiiska waaxda sharciyadda XKCS ee ku TR 04/08/2025.
2. **Markuu arkay** jawaab celinta ay soo gudbiyeen qareenada eedaysanaha ee ku TR 10/09/2025.
3. **Markuu arkay** cadeymanka lasoo bandhigay inay yahiin cadayman ku filan oo go'aan lagu gaari karo.
4. **Markuu arkay** emialka ay soo direen qareenada eeddeysanaha oo si cad looga fahmi karo in aysan diyaar u aheyn in ay muwakilkooda ka difaacaan eedda anshaxeed ee loo heysto.
5. **makuu arkay** qodobada 65, 75,77,82,88,89,90/4aad,97 xeerka anshaxa iyo aadaabta XKCS.
6. **markuu arkay** qodobka 2/1aad iyo qodobka 25 ee xeerka FIFA CODE AND ETHICS.
7. Markuu arkay dastuurka 2019 ee XKCS Qodobadiisa 59,60,61,64.

## GO’AANKA GUDDIGGA

Guddigga anshaxa iyo aadaabta asiga oo cuskanaya asbaabta sare ku xusan, waxa uu cadaaday eedeysane Cabdiqani saciid carab inuu ku xad gudbay Q25aad ee xeerka FIFA CODE AND ETHICS, waxaana lagu anshax mariyay:

1. Mudane Cabdiqani Saciid Carab waxaa laga mamnuucay howlaha la xariira kubadda Cagta Muddo **(3) sadax sano ah.**
2. Cabdiqani Saciid Carab Waxa lagu ganaaxay lacag dhan **$5,000 (Shan Kun oo Dollar).**
3. Go’aankaan waxaa ka furan Racfaan ku simman muddada uu sharcigu tilmaamay si waafaqsan qodobka qodobka 102 ee xeerka anshaxa iyo aadaabta XKCS,
4. Go’aankaan waxaa la gaaray maanta oo ay taariikhdu tahay 28/10/2025.

**SAXIIXA GUDDOOMIYAHA GUDDIGGA**

**AXMED CABDULQAADIR MAXAMED**

---

Wixii faahfaahin ah, fadlan kala xiriir
Xoghayaha Guddiga Anshaxa SFF
Email: disciplinary@footballsomalia.so.